

DIIWAANKA TALLAALKA ARDEYDA
SHURUUDAH A LAGA RABO DA'DA/FASALKA
(STUDENT IMMUNIZATION LAW AGE/GRADE REQUIREMENTS)

Inta soo socoto ayaa ah tirade ugu yar ee tallaalka da' walbo iyo fasal walbo sida waafaqsan Wisconsin Student Immunization Law (Sharciga tallaalka Ardayda). Shuruudahan ayaa looga tagi karaa sababo la xiriira caafimaadka, diinta ama sababo shaqsiyadeed. Tallalo dheeriya ayaa lagula tallin karaa ilmahaaga ayadoo ay ku xiran tahay da'da ilmaha. Fadlan la xiriir dhaqtarkaaga ama waaxda caafimaadka ee deegaankaaga haddii ilmahaaga u baahan yahay tallalo dheeriya.

Teebalka 144.03-A

Tallaalladii la iska rabay Sannad-dugsiyeedkii 2021-2022 iyo Sannadihii Kale ee ka Dambeeyey

Da'da/Fasalka	Tallaalka loo baahan yahay (Tirada Darsin)								
5 bilood ilaa 15 bilood	2 DTP/DTaP/DT		2 Polio			2 Hep B	2 Hib	2 PCV	
16 bilood ilaa 23 bilood	3 DTP/DTaP/DT		2 Polio	1 MMR		2 Hep B	3 Hib	3 PCV	
2 sanno ilaa 4 sanno	4 DTP/DTaP/DT		3 Polio	1 MMR	1 Var	3 Hep B	3 Hib	3 PCV	
Kindergarten ilaa Fasalka 6aad	4 DTP/DTaP/DT		4 Polio	2 MMR	2 Var	3 Hep B			
Fasalka 7 ilaa fasalka 11	4 DTP/DTaP/DT	1 Tdap	4 Polio	2 MMR	2 Var	3 Hep B			1 Mening
Fasalka 12aad	4 DTP/DTaP/DT	1 Tdap	4 Polio	2 MMR	2 Var	3 Hep B			2 Mening

1. Shuruuduhu ma dhaqangelin ilaa 1dii Feberaayo, 2023, oo sidaas awgeed sharcigiina lama dhaqangelin karin sannad-dugsiyeedkii 2021-2022 ama 2022-2023. Shuruudaha Tdap ee fasallada 7aad ilaa 11aad waxaa la hirgeliyey sannad-dugsiyeedkii 2023-2024. Shuruudaha Qooryooyaha (serogroup A,C,W,Y) waxaa la hirgeliyey sannad-dugsiyeedkii 2024-2025.
2. Iskuullada shuruud kuma aha xaqijintaa tallaallada Hib iyo PCV ee ardeyda Pre-K.
3. Carruurta > 5 jir ee bilaabeysa Farbarashada ama Pre-K waa in la qiimeeyo iyada oo la isticmaalayo shuruudaha tallaalka ee Barbaratooniga ama Kindergarten ilaa fasalka 5^{aad}, oo caadi ahaan waxaa loo eegaya ilma kasta da'diisa.
4. D= Jeermis sun ah, T = teetano, P = xiiqdheer. DTaP/DTP/DT/Td tallaal oo laga rabo arday kasta Xanaanada Caruurta ilaa Fasalk 12^{aad}. Afar qeybood ayaa khasab ah. Hase ahaatee, haddii arday soo qaataay qeybta 3^{aad} ka dib dhalashada 4^{aad}, qeybo dheeraad ah loogama baahna. **Ogow:** Qeyb ah wax ka yar 4^{aad} maalmood ka hor dhalashada 4aad waa la aqbali karaa.
5. Tallaallada carruurta ee DTaP/DTP/DT markay bilaabayaa Xanaanada: Mid kastaa waa in uuu soo qaataay hal qeyb dhalashada 4^{aad} si ay sharciga u raacaan (ama qeybta 3^{aad}, 4^{aad}, ama 5^{aad}). **Ogow:** qeyb ah wax ka yar 4^{aad} maalmood ka hor dhalashada 4aad waa la aqbali karaa.
6. Tdap waa teetanada dhallinta, gowracatada iyo tallaalka xiiqdheerta. Haddii arday soo qaataay hal qeyb oo tallaal teetanadu ku jirto, sida Td, 5 sano gudahood ka hor inta uusan bilaabin fasalka Tdap looga baahan yahay, ardeygu wuxuu raacay sharciga oo qeyb kale oo ah tallaalka Tdap loogama baahna.
7. Tallaalka dabeysa ee ardeyda bilaabeysa kindergarten ama barbaratooniga ilaa Fasalka 12^{aad}. Afar qeybood ayaa laga rabaa. Hase ahaatee, haddii arday soo qaataay qeybta 3^{aad} ka dib dhalashada 4^{aad}, qeybo dheeraad ah loogama baahna. **Ogow:** qeyb ah wax ka yar 4^{aad} maalmood ka hor dhalashada 4^{aad} waa la aqbali karaa.
8. Caddeyn sheybaar oo ah difaac in laga haysto cagaarshowga B waa la aqbali karaa.
9. MMR waa tallaalka jadeecada, qaamowqashiirka, iyo jadeeco-beenaadka. Darsinka ugu horeyo tallaalka MMR waa in aad qaadatay dhalashada 1^{aad}. Caddeyn sheybaar oo ah difaac in laga haysto dhammaan saddexda cudur (jadeecada, qaamowqashiirka iyo jadeeca-beenaadka) waa la aqbali karaa. **Ogow:** qeyb ah wax ka yar 4 maalmood ka hor dhalashada 1^{aad} waa la aqbali karaa.
10. Tallaalka Varicella waa tallaalka busbuska. Ardeyda uu ku soo dhacay xanuunka busbuska ama hablabaaska lagama rabo in ay qaataan tallaalka Busbuska. Dhakhtar, dhakhtar-caawiye, ama dhakhtar-xigeen daawo qora waa in ay soo caddeeyaan taariikhda busbuska ama hablabaaska iyagoo soo sheegaya in uu busbus ilmaha horay ugu soo dhacay oo waa in ay saxiixaan Foomka Talaalka Ardeyda (Foomka DHS 04020L). Ardeyda (marka laga reebo kuwa cusub iyo barbaratooniga) ee haysata warbixin waalid oo ah xanuun ku soo dhacay ka hor Meey 2024 waxaa loo tixgelinayaa wax la aqbalayo.
11. Hal mar oo ah tallaalka Qoorgooyaha (kooxda seero A,C,W,Y) ayaa laga raba ardeyda galeysa fasalka 7^{aad}, iyo tallaal ah xoojin ardeyda galeysa fasalka 12^{aad}. Ardeyda waxaa shuruuddan laga hubinayaa fasalka 7^{aad} iyo fasalka 12^{aad} keliya. Ardeyda Wisconsin ee hadda ku jirta fasalka 8^{aad}-11^{aad} lagama hubin doono shuruudahan ilaa ay bilaabaan fasalka 12^{aad}. Tallaal labaad lagama rabo ardeyda soo qaadatay tallaalka koowaad ee MenACWY marka ay da'doodu gaarto 16 jir ama ka weyn.

